

Leenka B ee METRO

Jidka 21 ayaa dhawaan yeelan doona gaadiid dheereeya.

Leenka B wuxuu gabi ahaan beddelli doonaa Jidka 21 isagoo ku bixinayo adeegyada maalinta dhan ah si ka dhaqsa badan oo joogto ah. Leenkan 13-ka mayl ah wuxuu isku xiri doonaa qaybaha kala duwan ee Minneapolis iyo St. Paul, taasoo sahlaysa isu socodka dhexdooda iyadoo ay 33 leedahay boosteejooyin heer sare ah. Bus rapid transit waxa uu safarkaaga baska ka dhigaa mid dhakhsa badan oo xiiso leh isagoo ku samaynayo horumarino kala duwan.

Leenka B wuxuu bixin doonaa adeeg cadaalad ah aag ay dad badani isticmaalaan gaadiidka, xitaa inta lagu jiro cudurka safmarka ah.

Safar dhakhsa badan

Hadafka Leenka B waa in laga dhigo adeega mid ka dhakhsa badan ku dhawaad 20%. Waa kan sida:

- Basasku u yareeyaan joogsigooda, iyagoo si weyn u dedejiya wakhtiga safarka.
- Mashiinnada tigidhada ee yaala boosteejooyinka ay ugu oggolaadaan macaamiisha inay iibsadaan tigidhada ka hor intaysan la fuulin gaarig lacag caddaan ah ama kaarka kiridhitka.

- Basaska sagxadoodu gaaban tahay iyo jid gooyaha dhaadheer ee ku yaala boosteejooyinka, iyo albaabada baska ee ballaaran iyo ka soo fuulida qaybta hore iyo qaybta danbe, u dedejiyaan fulitaanka.
- Kor u qaadida jid gooyada booteejada ay u beekhaamuso wakhtiga; basaska waxay si fudud u galii karaan wadada ka dib markay ku adeegaan boosteejo.
- Mudnaanta calaamadda iyo jidadka baska kaliya u gaarka ah ee meelaha muhiimka ah ay u oggolaadaan basaska inaysan istaagin.

Ka dhigista safarka mid wanaagsan

Hoyga joogsiga baska ee la horumariyay ayaa bixiya meel nabdoon oo ammaan ah oo lagu sugo baska, layskagana difaaco cimilada xun. Waxyaabaha uu qabo waxaa kamid ah:

- Meelaha la gashado baaskiilada
- Macluumaadka ku saabsan jidka, nidaamka gaadiidka, iyo aaga ku xeeran
- Kamaradaha amniga iyo taleefannada loo isticmaalo xaaladaha degdega
- Iftiin la horumariyay
- Kuleyliye laga daaro badhan la riixayo

Ka eeg khariidad faahfaahsan barta metrotransit.org/b-line-project



Jadwalka Mashruuca

| • 2020 | • 2021-2023 | • Guga 2023 | • Guga 2024 | • Juun 14, 2025 |
|--------------------------------------|--|---|--|-----------------|
| Goobaha boosteejada waa la ansixiyay | Naqshadaha boosteejada iyo horumarada kale | Dhismaha ayaa ka bilaabmay bariga Hiawatha Avenue | Dhismaha ayaa ka bilaabmay galbeedka Hiawatha Avenue | FURMAYAA |

CIDA LAGALA XIRIIRAYO MASHRUUCA:

Alyssia Bell

bline@metrotransit.org | 612-474-4753

Isbeddellada adeegga la xidhiidha

Marka la bilaabo Leenka B ee METRO, adeegga taraafikada ee ku teedsan waddada Lake Street/Selby Avenue/Marshall Avenue ee u dhaxaysa Minneapolis iyo magaalada hoose ee St. Paul waxay arki doontaa horumarin iyo isbeddel adeeg.

Jidka 21 waxa lagu badali doona Leenka B, kaas oo bixin doona adeeg dhakhso badan oo la isku halayn karo oo leh basas waaweyn iyo astaamo ay ka mid yihiin ka soo fuulista albaabada oo dhan, bixinta lacagta gaadiidka lagu raaco kahor intaan la soo fuulin, iyo mudnaanta ishaarada gaadiidka.

Si loo sii wado adeegga maxalliga ah ee waddada, basaska 17, 27, 38, iyo 72 ayaa ku shaqayn doona:

- Jidka 17 ayaa sii wadi doonta u adeegida aagga Minneapolis waxayna ku xidhi doontaa Leenka B ee ku yaala boosteejooyinkan:
 - Eastbound 17 iyo Leenka B:
 - » West Lake St. Station
 - » Lake & West Bde Maka Ska Station
 - » Lake & East Bde Maka Ska Station
 - Westbound 17 iyo Leenka B:
 - » Lagoon & Hennepin Station
 - » Lagoon & East Bde Maka Ska Station
 - » Lake & Dean Station
 - » West Lake St. Station
- Jidka 27 waxa uu taageeri doonaa macaamiisha ku xidhan aagga Abbott Northwestern Hospital, ee ka hawlgala inta u dhaxaysa Lake & Minnehaha iyo Hennepin & Lake/Lagoon. Waxay mari doontaa galbeedka 26th St. inta u dhaxaysa waddooyinka Cedar iyo Portland waxayna mari doontaa bariga 28th St. inta u dhaxaysa 4th Ave. & Cedar.
- Jidka **CUSUB** wuxuu isku dari doonaa jidadka 23 iyo 612. Marka Leenka B la furo, Jidka 38 wuxuu mari doonaa Lake-Lyndale-38th si uu ugu bixiyo adeeg maxalli ah inta u dhaxaysa boosteejooyinka Leenka B ee galbeedka Lyndale (meelaha sida Cub Foods oo ku taala Lake & Dupont).
- Jidka **CUSUB** ee 72 wuxuu isku xidhi doonaa Midway, Mac-Groveland, bartamaha magaalada St. Paul, iyo geeska bariga St. Paul.

Ahoow xog ogaal

Wixii ah macluumaadka macluumaadka guud ee mashruuca:

metrotransit.org/b-line-project

Khadka lagala xiriiro dhismaha: 651-356-6995

iimaylka wacyigelinta: BLine@metrotransit.org

Ma u baahan turjubaan?? Español, Hmoob, Soomaali, Oromoo, Karen

- Wac 612-373-3333, Dooro Xulashada 2
- Sheeg luuqada aad rabto: Español, Hmoob, Soomaali, Oromoo, Karen